

Sidee dugsiyadu go'aan uga gaari doonaan buundooyinka GCSE ee 2021

Tilmaamo loogu talagalay waalidiinta iyo daryeelayaasha ardayda Ingiriiska u isticmaala Luuqad Dheeraad ah (EAL) ahaan



Tilmaamahaan muxuu ka kooban yahay?

Halkaan waxaad ka heli kartaa macluumaad wax ku ool ah oo ku saabsan sida dugsiyadu u go'aamin doonaan buundooyinka GCSE ee ilmahaaga marka la gaaro xagaaga 2021. Waxaad sidoo kale heli doontaa talo ku saabsan waxa ilmahaagu sameyn karo si uu ugu diyaar garoobo iyo sida aad u caawin kartid.

Sanadkii la soo dhaafey iskuulo badan ayaa la xirey muddo dheer sababo la xiriira cudurka faafa ee loo yaqaan Covid-19. Arrintaan/sababtaan awgeed, dowladdu waxay go'aamisay inay cadaalad darro tahay in la qaato imtixaannada GCSE ee sannadkaan. Taas badalkeeda, macalimiintu waxay qiimeyn doonaan ilmahaaga waxayna go'aan ka gaari doonaan buundooyinkooda iyagoo isticmaalaya qaabab kale.

Buug tilmaameedkaan wuxuu ku siinayaa macluumaad ku saabsan:

- Sida dugsiya ilmahaaga iyo macalimiintu uga go'aan gaari doonaan buundooyinka ilmahaaga
- Waxa ay yihiin xaquuqaha ilmahaaga iyo waxa la sameeyo haddii aadan ku qanacsanayn buundada ama buundooyinka ilmahaaga
- Waxa aad sameyn karto si aad uga caawiso ilmahaaga inuu u diyaar garoobo qiimeynta

Si aad u akhrido tilmaamaha dawlada oo dhameystiran, booqo <https://www.gov.uk/government/publications/awarding-qualifications-in-summer-2021/awarding-qualifications-in-summer-2021>

1. Sidee ayay dugsiyadu go'aan uga gaari doonaan buundooyinka ilmahaaga?

Sanadkii la soo dhaafay Iskuulada ayaa ardayda badankood laga xirey usbuucyo badan oo waxbarista inteeda badan waxay ka dhacday khadka tooska ah muddadaas. Taasi waa sababta ay dowladda u go'aansatay in imtixaannada lagu beddelayo qiimeyn ay macallimiinta u sameeynayaan heerarka GCSE, AS iyo A.

- Ma jiri doonaan imtixaano uu qaadan doono cunugaaga xagaaga 2021. Macallimiintu waxay qiimeyn ku samayn doonaan shaqadaada taas oo ku saleysan shaqada aad qabatay intii lagu guda jirey casharadii aad khadka tooska ah ka baratay iyo waxbarashada fasalka. Macallimiintu waxaa laga yaabaa inay isticmaalaan imtixaannada buundooyinkooda aan la xisaabin sida caadiga ah iyo waraaqaha qiimeynta ee laga helo guddiyada imtixaanka si ay gacan uga geystaan go'aminta buundooyinka ilmahaaga.
- Ma jiraan imtixaanno xagaagan laakiin in la helo buundooyin fiican ma aha inay ka dhib badnaato sannadahii kale.
- Haddii macallimiinta ilmahaagu aysan ilmaha barin dhammaan casharrada ku jira barnaamijkooda waxbaridda ("manhajka"), waxay keliya ilmahaaga ku qiimeyn/imtixaani doonaan waxyaabaha ay bareen.
- Si loo go'aamiyo buundooyinka ilmahaaga, macallimiintaadu waxay eegi karaan dhammaan shaqooyinka ay ka soo saareen koorso maaddo ah, tusaale ahaan, shaqo kasta oo ilmahaaga u dhammaystiray luuqadda Ingiriisiga intii lagu jiray Marxalada 4-aad.
- Macallimiinta ilmahaaga waxay go'aan ka gaari doonaan buundooyinkooda goor dambe sannadkaan gudhihiisa. Taas waxaa u sabab ah waxay rabaan waxbarashada inay sii socoto illaa inta suurtagal ah maaddaama casharro badan la seegay intii lagu jiray xayiraadda. Macallimiintu waa inay soo gudbiyaan buundooyinka ugu dambeyn **18 Juun 2021**.
- Maadooyinka qaarkood ee dugsiyada sare waxay leeyihiin qiimeyno kala duwan oo imtixaannada ah, tusaale ahaan maadooyinka sida Qoob-ka-Cayaarka, iyo Naqshadeynta iyo Teknolojiyada. Kuwaani waa *qiimeyno aan imtixaan ahayn* (NEA). Ilmahaaga waa inuu sii wadaa u diyaar garowga NEA-yada siga caadiga ah. Macallimiinta ayaa saxi doonaan NEA-yada, waxayna qayb ka noqon doonaan buundooyinka ilmahaaga ee kama dambeysta ee maadooyinkaas.
- Ilmahaaga waa inuusan ka walwalin haddii uusan dhammeyn karin NEA-yada sababo la xiriira wax dhacay oo uu ugu wacan cudurka faafa ee Covid-19. Haddii ay taasi dhacdo, wax dhib ah ugama imaan doonaan ilmahaaga mana waayi doono wax buundooyin ah.
- Heerarka GCSE, AS iyo A, Farshaxanka iyo Naqshadeynta, buundooyinka ilmahaaga waxaa lagu salayn doonaan wadarta shaqooyinkii ay ka soo qabteen. ("Wadarta shaqooyinka" waa isku keenista dhammaan sawirada, dukumiintiyada iyo naqshadaha ee ilmahaaga ka sameyey mowduucan/maadadan.)

2. Maxaad sameyn kartaa haddii aadan ku qanacsanayn buundooyinka ilmahaaga?

Haddii aadan ku qanacsanayn buundooyinka ilmaahga uu helo, waxaad weydiisan kartaa inay wax ka badelaan. Habraacaan rasmiga ah waxaa loo yaqaan "racfaan ka qaadashada buundooyinkaaga". Waxaad u baahan kartaa inaad sidaas u sameyso laba sababood awgood:

1. Khaladaadka maamulka ama habraaca:

Dhibaatooyinka waxaa sababa qof si qalad ah buundooyinka ilmahaaga u geliya kumbuyuutar ama foom.

- Marka hore waa inaad ka codsataa dugsiyada inuu hubiyo inay khaladka sameeyeen.
- Haddii qalad jiro, dugsiyada ayaa la xiriiri doona guddiga imtixaanka. Haddii guddiga imtixaanku oggolaado, waxay baddeli doonaan buundooyinka ilmahaaga.



2. Khaladaadka ka dhasha xukminta tacliinta:

Tani waa marka aadan ku qanacsanayn buundooyinka uu bixiyay macalinka ilmahaaga, oo aad u malaynayso in buundooyinka aysan ahayn kuwo cadaalad ah.

- Haddii dugsiga uusan ku raacsanayn inuu dhacay khalad ka dhashay maamulida ama habraaca, ilmahaaga wuxuu xaq u leeyahay inuu dugsuga weydiisto inuu rafcaan u diro guddiga imtixaanka ayagoo ilmahaaga matalaya (tani waxaa loola jeedaa ayagoo isticmaalaya “magaca ilmahaaga”). Guddiga imtixaanka waxay go'aan ka gaari doonaan haddii macallinka ee saxiixay shaqadaada uu sameeyey khalad tacliimeed. Haddii ay kugu raacaan inuu jirey *khalad* tacliimeed, buundooyinka waa la bedeli doonaa.
- Fadlan xasuusnoow *khaladaadka* tacliimeed ee uu sameeyey macalinka ama macalimiinta waa inay noqdaan kuwo halis ah si buundooyinka loo badell.



Waxaa muhiim ah in la xasuusnaado in nidaamka racfaanka uu boondooyinka wax laga jari karo waxna lagu dari karo.

Ilmahaaga wuxuu/waxay buundooyinkooda heli doonaan markay tahay **10 Agoosto 2021 heli doontaa buundooyinkaaga heerarka AS iyo A sidoo kale 12 Agoosto 2021 waxaad heli doontaa buundooyinkaaga GCSE.**

3. Sideed u caawin kartaa ilmahaaga ka hor intaan buundooyinka la siinin?

Waqtiga ka horreeya inta macallimiinta ilmahaaga aysan go'aan ka gaarin buundooyinkiisa waa mid aad u muhiim ah. Ilmahaagu waa inuu sii wadaa shaqada adag si uu u wanaajiyo waxbarashadiisa iyo buundooyinkiisa. Adiga waalid ahaan ama daryeele ahaan, waxaad door muhiim ah kaqaadanaysaa caawintooda.

U diyaar garowga qiimeynta:

- Ka caawi ilmahaaga inuu go'aansado maadooyinka ugu muhiimsan ee ay ka shaqeynayaan. Waxaa jiri kara maadooyin ay hada kaga hooseeyaan filashooyinka dugsiga. Waqti yar ayaa ka haray kahor intaan buundooyinka la bixin, sidaas darteed waa muhiim in diiradda la saaro meelaha ugu muhiimsan.
- Ku caawi ilmahaaga qorshaynta jadwalkooda murajac samaynta inta ay joogaan guriga si ay u ogaadaan waxa ay tahay inay sameeyaan iyo inta wakhti ee ay haystaan. Si joogto ah u hubi ilmahaaga si aad u xaqiijiso in ay ku dhegan yihiin jadwalka shaqadooda oo ka caawi inay la jaanqaadaan markasta oo ay suurtagal tahay.
- Waxaad hubin kartaa aqoonta iyo fahamka cunugaaga ee mowduuc ay baranayaan adigoo weydiinaya su'aalo ku saabsan mowduucaas marka la joogo guriga. Weydii inay kuu sharxaan. Tusaale ahaan, haddii ay isu diyaarinayaan imtixaanka hadalka, waxay ku tababaran karaan guriga.
- Ku caawi ilmahaaga shaqadooda guriga. U samee jadwalka shaqada guriga oo ka hubi horumarkooda. Haddii ay suurtagal tahay, u samee meel jawi deggan leh oo ay wax ku bartaan halkaas oo ay ugu fududaanayso ilmahaagu inuu wax ku barto.
- Waa muhiim inaad xiriir joogto ah la yeelatid dugsiga inta suurtagalka ah. Haddii ay kugu adkaato inaad ku hadasho Ingiriisiga, weydii haddii dugsigu ku siin karo adeeg turjumaan.
- La hadal dugsiga haddii aad ka walwalsan tahay wax ku saabsan ilmahaaga.



Muhiimadda ay leedahay horumarinta xirfadda luqadda Ingiriisiga:

- Ku dhiiri geli ilmahaaga inuu sii wado akhrinta Ingiriiska. Akhrisku wuxuu ka caawin doonaa ilmahaaga inuu kobciyo fahamka ereyada iyo naxwaha Ingiriisiga ee uu u baahan doono inta lagu jiro qiimeynta macallinka. 'Akhristayaasha Darajooyinka leh' waa buugaag mala awaal ah iyo kuwo aan mala-awaal ahayn oo heerar kala duwan oo luqadda Ingiriisiga ah (tusaale ahaan, bilow, dhex-dhexaad, sare). [Penguin Graded Readers](#) iyo [Macmillan Graded Readers](#) waxay leeyihiin buugaag badan oo noocan ah. Haddii aadan adigu u iibin karin, weydii dugsiya ilmahaaga haddii ay kuu iibin karaan.
- Xasuusi ilmahaaga inuu isticmaalo qaamuus laba luuqadood ah si uu ereyada u tarjumo. Ku dhiirageli ilmahaaga inuu qoro ereyo cusub oo Ingiriis ah isagoo isticmaalaya qaamuus qoraaleed (qaamuus yar) kadibna uu ereyada ugu turjumo luuqadiisa hooyo. Haddii aadan u iibin karin qaamuus, weydii dugsiya ilmahaaga haddii ay iyagu kuu iibin karaan. Ilmahaaga wuxuu isticmaali karaa turjumaada khadka tooska ah sida [Google Translate](#).
- Ku dhiiri geli ilmahaaga inuu dhagaysto Ingiriisiga sida rasmiga ah loogu hadlo. [TED Talks](#) webseedku waa kheyraad wanaagsan oo leh muuqaalo bilaash ah oo ku saabsan mowduucyada tacliinta, oo qoraalo lagu turjumay luuqado badan leh.



Isticmaalka luuqaddaada koowaad:

Dhammaan shaqada looma baahna in lagu qabto Ingiriis. Qiimo weyn ayey u leedahay cunugaaga inuu isticmaalo luuqadooda hooyo. Isticmaalka luqaddaada hooyo waxay kaa caawin kartaa kobcinta Ingiriisiga waxayna ilmahaaga ka caawin kartaa u diyaargarowga imtixaanaadka. Waxaa u fududaan karta ilmahaaga inuu fahmo fikradaha tacliimeed marka la isticmaalo afkooda hooyo marka loo eego Ingiriisiga.

- Waxaad ku caawin kartaa ilmahaaga shaqadooda guriga adigoo isticmaalay luqaddaada hooyo. Shaqada dugsiya uu usoo dhiibey ilmahaaga waxay noqon kartaa mid ku baxda luuqada Ingiriiska, laakiin waxaad ilmahaaga kagala hadli kartaa arrintaas luqaddaada goys ahaan.
- Badanaa waxaa caawin karta ilmahaaga inuu qoro koobiga shaqadooda isagoo ku qoraya afkiisa hooyo ka dibna uu ku turjumo Ingiriisiga goor dambe. Waad aqrin kartaa koobigooda oo waxaad ka bixin kartaa faallooyin kahor intaysan bilaabin qorista tarjumaadda.
- Haddii ilmahaagu ku qasbanaado inuu shaqadiisa ku qoro oo keliya Ingiriisiga, weli waxaad weydiisan kartaa inay kuugu sheegaan afkaaga hooyo wixii ay qoreen. Sidaan adiga iyo ilmahaaguba waxaad hubin kartaan tayada shaqada ardayga.
- Baadhitaanka mawduucyada dugsiya iyadoo la isticmaalayo buugaagta ama websaydhada ku qoran luqaddiina waxay gacan ka geysan kartaa wxbarashada ilmahaaga. Tusaale ahaan, ilmahaaga wuxuu isticmaali karaa websaydhka bilaashka ah ee [Khan Academy](#) si uu muraajac ugu sameeyo maadooyin badan. Websaydhka waxaa loo tarjumay 30 luqadood oo kala duwan.



Copyright

Dhammaan xaquuqaha dabaacaada waa la ilaaliyey. Iyadoo aan loo eegin isticmaalka la ogol yahay ee buug-tilmaameedkaan "Sidee ayey iskuulladu u go'aamin doonaan buundooyinka GCSE sanadka 2021: Tilmaamo loogu talagalay waalidiinta iyo daryeelayaasha ardayda Ingiriiska u isticmaasha Luuqad Dheeraad ah (EAL)" ahaan, ee ah kuwa soo socda: "Macallimiinta waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay tilmaamaha la wadaagaan waalidiinta ardaydooda iyagoo isticmaalaya iimayl, boostada, ama fool-ka-fool. Waxaa sidoo kale la soo jeedinayaa in macallimiintu ay haystaan nuqulada warqaddaha luuqadda, iyo nooc Ingiriis ah oo warqaddaas ah si ay tixraac ugu sameeyaan, inta lagu jiro wadahadal kasta oo ay la yeelanayaan waalidiinta." Ma jirto qeyb ka mid ah daabacaadan dib loo soo saari karo qaabkey doonto ha noqotee (oo ay ku jirto in loo kaydiyo qaab kasta oo elektaroonig ah iyo haddii is kas ama kamac ah loogu isticmaalo qaab kale) iyadoon oggolaansho qoraal ah laga helin milkiilaha xaquuqada daabacaada. Codsiiyada lagu raadinayo oggolaanshah qoran ee xuquuqda daabacadda milkiilaha si koobi looga soo saaro qeyb ka mid ah daabacaadan, waa in loo diraa daabacaha.

Copyright © The Bell Educational Trust Limited (oo u shaqeynaysa The Bell Foundation ahaan)

The Bell Educational Trust Limited waa shirkad samafal oo ku xaddidan lambarka dammaanadda 1048465, oo la aasaasay 5 tii Abriil 1972, waana hay'ad samafal oo ka diiwaangashan Hay'adda Samafalka lambarkeeduna yahay 311585
The Bell Foundation, Red Cross Lane, Cambridge CB2 0QU